



# Sagor för barn på svenska

[berattelser.se](http://berattelser.se)

## Fasaxyadii lala joogay ayeeyo

Skreven av: Violet Otieno

Illustrerad av: Catherine Groenewald

Översatt av: Abdi Muse

Denna saga kommer från African Storybook ([africanstorybook.org](http://africanstorybook.org)) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<http://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.

Detta verk är licensierat under en Creative Commons

[Erkännande 4.0 Internasjonal Licens.](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.sv)

<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.sv>

## Fasaxyadii lala joogay ayeeyo



✎ Violet Otieno


🔗 Catherine Groenewald

📖 Abdi Muse

😊 somaliska

📖 nivå 4






Odongo iyo Apiyo waxay kula noolaayeen magaalada aabahood. Waxay sugayeen fasaxyada. Ma aha sababti la iskuulka la xidhay, laakiin waxay u doonayeen in ay soo booqdaan ayeeyadood. Waxay ku nooleed tuulo kalluumeysi oo u dhaw laag ballaaran.



Odongo iyo Apiyo way faraxsanayeen sababtoo ah waxa ay ahayd wakhtigi! ay soo boogan lahayeen ayeeyadood. Habeen ka hor, ayay xidhxidheen waxayna u diyaar garoobeen safarka dheer ee tuuladeeda. Way seexan kari wayayeen, waxayne ka shekeysten habeenkii oo dhan fasaxa.




Aroortii hore ee subixii xigay, waxay ka tageen tuulada waxay raaceen baabuurki aabbahood. Waxay sii mareen buuro, xayawaanka duurjoogta ah iyo beeraha caleen shaaha. Waxay tiriyeen baabuurta iyagoo ku heesayo heeso.



Markii Odongo iyo Apiyo ay dib ugu noqdeen iskuulki waxay u sheegeen saaxiibadood nolosha tuulada. Carruurta qaarkood waxay dareemeen in nolosha magaalada ay wanaagsantahay. Qaar kale waxay dareemeen in tuuladu ay ka fiicantahay. Laakiin badankood, waxay isku raaceen in Odongo iyo Apiyo ay lahaayeen ayeeyo wanaagsan!

Muddo ka dib, carruurtii way daaleen hudo ayayna la dhaceen.



Odongo iyo Apiyo labadoodaba waxay si adag hab usiiyeen ayeeyadood waxayna yiraahdeen nabad galyo.






Aabahood ayaa toosiyey Odongo iyo Apiyo markii ay yimaadeen tuulada. Waxay heleen Nyar-Kanyada, ayeeyadood, iyadoo ku fadhida darin geed hoostiisa. Nyar-Kanyada Luo ahaan, waxaa loola jeedaa “gabadhii reer Kanyada”. Waxay ahayd haweeney xoog leh oo qurux badan.



Markii aabbahood u yimid in uu wado, ma aysan doonayn in ay baxaan. Carruurta waxa ay baryeen Nyar-Kanyada in ay u raacdo magaalada. Way dhoola cadaysay oo waxay tiri: “Aad ayaan u weynahay in aan magaalada aado. Waxaan sugayaa in aad mar kale iigu imaataan tuuladayda.”

Nyar-kanyada waxay ku soo dhaweystay guriga waxayna ku nilikiyen golka iyagoo ku wareegayo oo u heysayo si farsad leh. Carruurta ay ayeeyada u tahay waxa ay ahaayeen kuwo ku faraxsan in ay iyada siiyaan hadiyad ay kasoo gadeen caasimada. "Marka hore fur hadiyaddayda," ayuu yidhi Odongo. "Maya, hadiyaddayda marka hore!" ayeey tiri Apiyo.



Laakiin si dhakhso ah ba fasaxyada waa ay dhammaadeen caruurtana waxa ay ahayd iney ku laabtaan magaalada. Nyar-kanyada waxay siiyey Odongo koofiyaad Apiyo na funaanad dhaxameed. Waxay u diyaarisay cunto safarkooda.





Ka dib markii ay furtay hadiyadaha, Nyar-Kanyada ayaa u ducaysay caruurta ayeeyada u aheyd si hab dhaqameed ah.




Dhammaadkii maalinta waxay wada cabbeen shaah. Waxay ka caawiyeen ayeeyadood tirinta lacagta ay heshay.



Dabadeed Odongo iyo Apiyo ayaa banaanka u  
daxay. Waxay caydh caydhsadeen balan baalis iyo  
shimbiro.




Maalin kale, carruurtu waxay suuga u raaceen Nyar-  
kanyada. Waxay laheyd sandaqad ay ku iibiso  
khudaarta, sonkorta iyo saabuunta. Apiyo waxay  
jeclayd in ay u sheegto macaamiisha qiimaha  
alaabta. Odongo muxuu u soo hagaajiyaa alaabta  
ay macaamiisha iibsadeen.






Waxa ay fuuleen geedaha waxayna firfirdhiyeen biyaha laagta.



Hal Subax, Odongo waxuu kaxeeyay sicihii ayeeydiis si ay u soo daaqaan. Waxay ku ordeen beertii deriska. Beeraalihii wuxuu u xanaaqay Odongo. Waxa uu ku hanjabay in uu ilaaliyo lo'da cunaayo dalagiisa. Maalintii ka dib, wiilku wuxuu ku dadaalay in lo'du aanay mar kale dhibaato ka soo gaarin.

Marku uu mugdi galay waxay kusoo laabteen guriga si ay u cashayaan. Ka hor inta aysan dhamaysanin cuntada, hurdey ayay la dhaceen!



Nyar-kanyada waxay bartay caruurta ayeyada u tahay sida loo kariyo soor jilicsan si ay ugu cunaan fuudka. Waxay tustay sida loo sameeyo bariska qumbaha si ay ugu cunaan kalluunka duban.





Maalintii xigtay, caruurta aabahood ayaa dib ugu laabtay magaalada iyagana uga tagay Nyar-Kanyada.



Odongo iyo Apiyo waxay ka caawiyeen ayeeydood shaqada guriga. Waxay u soo dhaamiyeen biyo waxayne u soo gureen xaabo. Waxay soo uruureen ukumo iyo caws ooy kasoo aruuriyeen digaaga iyo beerta.